



Falanqaynta Xulashooyinka Qabyo-qoraalka Soo-jeedinta D

PPS Isbahaysiga Hagidda Koonfur-bari (Southeast) ee Jiilaalka 2022

Janaayo 12, 2022

Xulashooyinka Habeynta Barnaamijka

Janaayo 6, 2022, Isbahaysiga Hagida Koonfur-Bari waxay siiyeen Degmada iyo FLO Analytics xulashooyinka ay ku sahamiyaan meelaynta Barnaamijyada Laba Luuqad Wax-ku-barashada (DLI) iyo hubinta in Harrison Park iyo dugsiyada dhexe ee Lane la diwaangeliyo si ay u gaadhaan yoolka diiwaangelinta 2025-26 ee 500 ee ah oo arday.

Xulashooyinka Qabyo-qoraalka Soo-jeedinta D waxay ku dhisan yihiin fikradaha soo socda ee meelaynta barnaamijka muhiimka ah.

- **Creative Science School ayaa dib loogu raray Bridger isagoo ah K-8.** Qaabaynta diiwaangelinta la saadaaliyay ee 2025-26, waxa la qiyaasayaa in ku dhawaad kala badh dugsiya lagu qori doono bakhtiyaanasiib halka badhka kalena lagu qori doono ardayda ku nool aagga dugsiya. Qeybta bakhtiyaanasiibka waxa loogu talagalay inuu agagaarka ka diiwaangeliyo arday ka badan kuwa meelaha fog, iyadoo lagu qaatay hababka diiwaangelinta ee hadda jira ee Creative Science School. Tani macnaheedu maaha inay ka tarjumayso habka dhabta ah ee ardayda loogu diiwaangelinayo barnaamijyadan haddii qaabayntan la hirgeliyo.
- **Isbaanishka DLI ee heerka K-5 wuxuu ku yaal Arleta iyo Lent, oo ah qaabaynta goobeed oo isku dheeli tiran.** Qaabaynta diiwaangelinta la saadaaliyay ee 2025-26 waxaanu u kala qaybinay barnaamijka Bridger ee labada-dhinac ah xaga Arleta iyo Lent, waxaan u rarnay barnaamijka halka-dhinac ah ee Atkinson xaga Arleta. Barnaamijka horay u jiray ee halka-dhinac ah ee Lent ayaa ahaan doona sidiisa. Tani macnaheedu maaha inay ka tarjumayso habka dhabta ah ee ardayda loogu diiwaangelinayo barnaamijyadan haddii qaabayntan la hirgeliyo.
- **Shiinayska DLI ee heerka K-5 wuxuu sii ahaanayaa Clark (oo hore u ahaan jiray Harrison Park) iyo Woodstock, ee goobtooda qaab wadaaga ee horay u jiray.** Barnaamijka Clark waa hal-dhinac, barnaamijka Woodstock-na waa laba-dhinac.

Xulashooyinka Isdiwaangelinta ee Harrison Park Middle School

Barnaamijyada K-5 ee xaafaddaha ee Clark (oo hore u ahaan jiray Harrison Park) iyo Vestal waxay sii ahaan doonaan u gudbiyayaasha daruuriga u ah Harrison Park. Waxaan filan karnaa in ku dhawaad 270 arday ay ka yimaadaan aagagooda ay ku yaalaan. Tani waxay ka dhigan tahay inaan u baahanahay inaan ku darno ku dhawaad 230 arday si aan u gaarno yoolka diiwaangelinta ee 500 ah. Kuwan soo socdaa waa barnaamijyo iyo dugsiyo ardayda u gudbin kara Harrison Park si tan loo gaaro.

- **K-5 Shiinaha DLI ee Clark iyo Woodstock.** Tani waxay ku biirinaysaa ku dhawaad 170 arday. Xulashadani waxay keeni doontaa kala qaybsanaata u gudbinta Woodstock ee u dhaxaysa barnaamijka xaafadda iyo barnaamijka Shiinayska DLI, maadaama barnaamijka xaafadda Woodstock uu u gudbin doono Hosford ama Lane. (Xulashada D1)
- **K-5 Isbaanishka DLI ee Lent iyo Arleta.** Tani waxay ku biirinaysaa ku dhawaad 260 arday. Xulashadani waxay keeni doontaa kala qaybsanaan u gudbiyaha Arleta ee u dhaxaysa barnaamijka xaafadda iyo barnaamijka DLI ee Isbaanishka,

iyadoo barnaamijka xaafadu u gudbinayo Kellogg. Xulashadani waxay sidoo kale keeni doontaa kala qaybsanaan u gudbiyaha Lent ee u dhaxaysa barnaamijka xaafadda iyo barnaamijka DLI ee Isbaanishka, (*Xulashada D3, D4*)

- **K-5 Jabaaniis DLI ee Richmond.** Tani waxay ku biirinaysaa ku dhawaad 270 arday. (*Lama qaabayn*)
- **K-5 Ruush DLI ee Kelly.** Tani waxay ku biirinaysaa ku dhawaad 50 arday. Xulashadani waxay keeni doontaa kala qaybsanaan u gudbiyaha Kelly ee u dhaxaysa barnaamijka xaafadda iyo barnaamijka DLI ee Ruushka, (*Xulashada D2*)
- **Xaafada K-5 ee Atkinson.** Tani waxay ku biirinaysaa ku dhawaad 140 arday, iyadoo ku xidhan sida soohdimaheeda loo sameeyay. Xulashadani waxay dhalinaysaa qaybsanaanta u gudbinta heer dugsi sare ah maadaama Harrison Park la filayo inay u gudbiso McDaniels High School iyadoo Atkinson ay ku ag taal Franklin High School. (*Xulashooyinka D1, D2*)
- **Xaafadda K-5 ee Lent.** Tani waxay ku biirinaysaa ku dhawaad 140 arday, iyadoo ku xidhan sida soohdimaheeda loo sameeyay. Xulashadani waxay keeni doontaa kala qaybsanaanta u gudbiyaha Lent ee u dhaxaysa barnaamijka xaafadda iyo barnaamijka DLI ee Isbaanishka, (*Xulashooyinka D2, D3, D4*)
- **Xaafadda K-5 ee Marysville.** Tani waxay ku biirinaysaa ku dhawaad 140 arday, iyadoo ku xidhan sida soohdimaheeda loo sameeyay. *Xulashadani waxaa la qaadana karaa oo keliya haddii barnaamijka xaafadda K-5 ee Lent uu sidoo kale u gudbiyo Harrison Park.* Haddii kale waxa ay Kellogg u abuuraysaa aag dugsiyeed aan isku xirnayn. (*Lama qaabayn*)

Xulashooyinka Isdiiwaangelinta Lane Middle School

Qaabka aan u qorno Harrison Park waxay saamayn ku leedahay Lane Middle School. SEGC waxay u soo bandhigtay afar xulasho dhamaan dhinacyada Wax-ku-barashada Shiineysku ay isugu yimaadaan dugsi dhexe, oo uu ku jiro Lane. Dhammaan xulashooyinka Qabyo-qoraalka Soo-jeedinta D, barnaamijyada K-5 ee xaafadda ee Whitman, Woodmere, iyo Kelly waxaa loo malaynayaa inay sii ahaanayaan kuwo u gudbiya Lane. Ku darida Shiineyska DLI waxay keenaysaa Wax-ku-barashada Ruushku inay u wareegto Harrison Park ee Qabyo-qoraalka Soo-jeedinta D2. Kuwan soo socdaa waa barnaamijyo iyo dugsiyo u gudbin kara Lane:

- **K-5 Shiinaha DLI ee Clark iyo Woodstock.** Tani waxay ku biirinaysaa ku dhawaad 170 arday. Xulashadani waxay keeni doontaa kala qaybsanaanta u gudbinta Clark ee u dhaxaysa barnaamijka xaafadda iyo barnaamijka Shiineyska DLI, maadaama barnaamijka xaafadda uu u gudbin doono Harrison Park. Si taas la mid ah, xulashadani waxay keeni doontaa kala qaybsanaan u gudbiyaha Lent ee u dhaxaysa barnaamijka xaafadda iyo barnaamijka DLI ee Shiineyska, (*Xulashada D2*)
- **K-5 Ruush DLI ee Kelly.** Tani waxay ilaalinaysaa ku dhawaad 50 arday. (*Xulashooyinka D1, D3, D4*)
- **Xaafadda K-5 ee Lewis.** Tani waxay ku biirinaysaa ku dhawaad 140 arday, iyadoo ku xidhan sida soohdimaheeda loo sameeyay. Xulashadani waxay hoos uga dhigaysaa isdiiwaangelinta Sellwood Middle Schools 500. (*Xulashooyinka D1, D3*)
- **Xaafadda K-5 ee Woodstock.** Tani waxay ku biirinaysaa ku dhawaad 140 arday, iyadoo ku xidhan sida soohdimaheeda loo sameeyay. Xulashadani waxay keeni doontaa kala qaybsanaan u gudbiyaha Lent ee u dhaxaysa barnaamijka xaafadda iyo barnaamijka DLI ee Shiineyska, (*Xulashada D2, D4*)

Xulashooyinka Qodobbada Farsamo ee Qabyo-qoraalka Soo-jeedinta D

Qeybaha Isdiwaangelinta Dugsiga Dhexe

Guud ahaan lixda dugsiga dhexe ee gobolka koonfur-bari, waxa jira ku dhawaad 2,600 arday oo xaafaddaha ah oo la saadaaliyay 2025-26. Shaxda hoose waxay muujinaysaa qaybinta isdiwaangelinta xaafaddaha iyadoo lagu salaynayo soohdimaha dugsiga dhexe ee hadda jira. Dhanka Harrison Park, soohdintu waxay ka kooban tahay Clark iyo Vestal. .

Dugsiga	Barnaamijka	Saadaasha 2025-26 ee Diiwaangelinta	Dugsiyada Gudbinta
Harrison Park	Xaafadda	335	Clark, Vestal
Hosford	Xaafadda	495	Abernethy, Buckman, Grout, Woodstock
Kellogg	Xaafadda	572	Arleta, Creston, Lent, Marysville
Lane	Xaafadda	308	Kelly, Whitman, Woodmere
Mt. Tabor	Xaafadda	320	Atkinson, Glencoe
Sellwood	Xaafadda	568	Duniway, Lewis, Llewellyn

Waxaa jira ku dhawaad 760 ardayda dugsiga dhexe oo Laba Luuqadood Wax-ku-barta ee gobolka koonfur-bari oo loo saadaaliyay 2025-26. Jadwalka hoose wuxuu muujinayaa qaybinta diiwaangelinta ee afarta barnaamij ee luqadeed.

Barnaamijka Ku-barashada Labada Luuqadood	Saadaasha 2025-26 ee Diiwaangelinta
Shiineys DLI	168
Isbaanish DLI	266
Jabbaaniis DLI	273
Ruush DLI	55

Soohdimaha Xulashada Qabyo-qoraalka Soo-jeedinta D

Soohdimaha loo isticmaalo in lagu qiyaaso isdiwaangelinta xulashooyinka hoose ayaa ugu horrayn la mid ah kuwa lagu arkay Qabyo-qoraalka Soo-jeedinta C. Soohdimaha ku jira Qabyo-qoraalka Soo-jeedinta C ayaa la sameeyay si looga foggaado in la gooyo waddooyinka waaweyn iyo in la abuuru aag dugsiyeedyo badan oo kooban. Dhammaan xulashooyinka, waxaa jira dib u habeyn lagu sameeyay soohdimaha u dhow Kellogg si loo hubiyo aaggaga dugsiyada Harrison Park iyo Bridger, iyo in la hubiyo in Kellogg ku jiro aag dugsiyeedkiisa. Ikhtiyaarka D3 ayaa lagu sameeyay hagaajin si loo soo celiyo qeybta kamidka ah aagga Atkinson ee loo qoondeeyay Glencoe. Kuwani waa isbeddellada kaliya ee soohdinta ee Qabyo-qoraalka Soo-jeedinta

C. Soohdimaha kama dambaysta ah waxaa ku talin doona SEGC ka dib marka go'aan laga gaadho goobaha barnaamijka.

Eegida Isbarbardhiga Meelaynta Dugsiyada Hoose

[Jadwalka isbarbardhiga barnaamijku](#) wuxuu bixiyaa dulmar guud oo ku saabsan habaynta dugsiyada dhexe ee xulasho kasta oo kamid ah Xulashada Qabyo-qoraalka Soo-jeedinta D.

Cusboonaysiinta Isqorista 2021-22

Ogsoonow: Is-qorista 2021-22 hadda waxay ku salaysan tahay tirooyinka dhabta ah halkii ay saadaasha ka ahaan lahayd. Isbarbardhiga tirooyinka dhabta iyo saadaasha ah [ayaa halkan ku qoran.](#)

Xulashada Qabyo-qoraalka Soo-jeedinta D1

Qoddobada ugu muhiimsan:

- **K-5 Shiineyska DLI ee Clark iyo Woodstock waxay ardayda u gudbinayaan Harrison Park.** Tani waxay keeni doontaa kala qaybsanaata u gudbinta Woodstock ee u dhaxaysa barnaamijka xaafadda iyo barnaamijka Shiineyska DLI, maadaama barnaamijka xaafadda Woodstock uu u gudbiyo Hosford ama Ikhtiyaarka D1.
- **K-5 Isbaanishka DLI ee Arleta iyo Lent ayaa ardayda u gudbinaya Kellogg.** Kellogg ayaa isdiwaangelinta buux dhaafi doonta haddii aan hal ma dhawr barnaamij oo xaafadeed meel kale loo rarin.
- **Xaafada Atkinson K-5 waxay ardayda u gudbinaysaa Harrison Park.** Tani waxay dhalinaysaa kala qaybsanaanta u gudbiyaha heer dugsi sare ah maadaama Harrison Park la filayo inay u gudbiso McDaniels High School iyadoo Atkinson ay ku ag taal Franklin High School.
- **Xaafada Creston K-5 waxay ardayda u gudbinaysaa Hosford.** Tani waa si looga foggaado buuxdhaafinta Kellogg iyo yaraanshaha isdiwaangelinta ee Hosford.
- **Xaafada Lewis K-5 waxay ardayda u gudbinaysaa Lane (sida ku cad Qabyo-qoraalka Soo-jeedinta C).** Tani waxay keenaysaa in isdiwaangelinta Sellwood Middle School ay hoos uga dhacdo 500.

Kheyraadka Xulashada D1:

[Guudmarka tirakoobka D1](#)

[Tubta sawirka u gudbiyaha D1](#)

Xulashada Qabyo-qoraalka Soo-jeedinta D2

Qoddobada ugu muhiimsan:

- **K-5 Shiineyska DLI ee Clark iyo Woodstock waxay ardayda u gudbiyaan Lane.** Tani waxay keeni doontaa kala qaybsanaanta u gudbiyaha Clark ee u dhaxaysa barnaamijka xaafadda iyo barnaamijka DLI ee Shiineyska,
- **K-5 Isbaanishka DLI ee Arleta iyo Lent ayaa ardayda u gudbinaya Kellogg.** Kellogg ayaa isdiwaangelinta buux dhaafi doonta haddii aan hal ma dhawr barnaamij oo xaafadeed meel kale loo rarin.
- **K-5 Ruush DLI ee Kelly ayaa ardayda u gudbinaya Harrison Park.** Tani waxay keeni doontaa kala qaybsanaan u gudbiyaha Kelly ee u dhaxaysa barnaamijka xaafadda iyo barnaamijka DLI ee Ruushka,
- **Xaafada Atkinson K-5 waxay ardayda u gudbinaysaa Harrison Park.** Tani waxay dhalinaysaa kala qaybsanaanta u gudbiyaha heer dugsi sare ah maadaama Harrison Park la filayo inay u gudbiso McDaniels High School iyadoo Atkinson ay ku ag taal Franklin High School.
- **Xaafadda Lent K-5 waxay ardayda u gudbinaysaa Harrison Park.** Tani waxay keeni doontaa kala qaybsanaanta u gudbiyaha Lent ee u dhaxaysa barnaamijka xaafadda iyo barnaamijka DLI ee Isbaanishka,

- **Xaafada Woodstock K-5 waxay ardayda u gudbinaysaa Lane.** Tani waxay ka hortagaysaa qaabka u gudbinta kala qaybsan ee barnaamijka Shiineyska DLI ee goob wadaagga ah.
- **Xaafada Creston K-5 waxay ardayda u gudbinaysaa Hosford.** Tani waa ka hortagaysaa buuxdhaafinta Kellogg iyo yaraanshaha isdiiwaangelinta ee Hosford.

Khayraadka Xulashada D2:

[Guudmarka tirakoobka D2](#)

[Tubta sawirka u gudbiyaha D2](#)

Xulashada Qabyo-qoraalka Soo-jeedinta D3

Qoddobada ugu muhiimsan:

- **K-5 Isbaanish DLI ee Lent iyo Arleta waxay ardayda u gudbinayaan Harrison Park.** Tani waa u gudbin ka soo baddelmatay Kellogg oo u baddelmatay barnaamijka DLI ee Isbaanishka ee Lent. Tani waxay keenaysaa kala qaybsanaanta u gudbinta Arleta oo barnaamijkeeda xaafadda ee u gudbinta Kellogg iyo barnaamijkeeda DLI ee Isbaanishka ee u gudbinta Harrison Park.
- **K-5 Shiineyska DLI ee Clark iyo Woodstock waxay ardayda u gudbiyaan Kellogg.**
- **Xaafadda Lent K-5 waxay ardayda u gudbinaysaa Harrison Park.** Tani waa u gudbinta ka soo baddelmaysa Kellogg kana fogaanaysaa u gudbinta kala qaybsanaanta barnaamijka DLI ee Isbaanishka.
- **Xaafada Lewis K-5 waxay ardayda u gudbinaysaa Lane (sida ku cad Qabyo-qoraalka Soo-jeedinta C).** Tani waxay keenaysaa in isdiiwaangelinta Sellwood Middle School ay hoos uga dhacdo 500.

Kheyraadka Xulashada D3:

[Guudmarka tirakoobka D3](#)

[Tubta sawirka u gudbiyaha D3](#)

Xulashada Qabyada Soo-jeedinta D4

Qoddobada ugu muhiimsan:

- **K-5 Shiineyska DLI ee Clark iyo Woodstock waxay ardayda u gudbinayaan Hosford.** Tani waxay keeni doontaa kala qaybsanaanta u gudbiyaha Clark ee u dhaxaysa barnaamijka xaafadda iyo barnaamijka DLI ee Shiineyska,
- **K-5 Isbaanishka DLI ee Arleta iyo Lent ayaa ardayda u gudbinayaan Harrison Park. Xaafadda Lent K-5 waxay ardayda u gudbinaysaa Harrison Park.** Tani waxay ka hortagaysaa kala qaybsanaanta u gudbiyaha Lent ee u dhaxaysa barnaamijka xaafadda iyo barnaamijka DLI ee Isbaanishka.
- **Xaafada Woodstock K-5 waxay ardayda u gudbinaysaa Lane.** Tani waxay sababtaa kala qaybsanaanta u gudbiyaha Woodstock ee u dhaxaysa barnaamijka xaafadda iyo barnaamijka DLI ee Shiineeska,

Khayraadka Xulashada D4:

[Guudmarka tirakoobka D4](#)

[Tubta sawirka u gudbiyaha D4](#)